

Kalluunka qalinka ah

Waa xansharaad bilaa baad ah ,iftiinka dhibsada, midabkiisu qalin yahay (anba dahabi ah) waa xansharaad qadiimi ah oo dharerkiisu yahay 12 millimitir. Kobcintiisu waxay qaadata muddo 1 sanno ah. Waa cayayaan jecel meelaha diiran iyo meesha qoyan, waxaana badanka lagu arkaa musqulaha, jikada iyo meelaha la mid ah.

Kalluunkaasi waxa uu banaanka usoo baxaa habeenkii waxaa naaneys loogu saarey ”habeen socod” waana xansharaad aan xanaaq lahayn. Iftiinka ayuu dhibsadaa wuxuuna jecelyahay meelaha mugdiga ah matalan jikada, musqusha (suuliga) iyo armaajooyinka jikada (kabadhaha) hoostooda iyo meelo kaloo badan.

Waxa uu xansharaadkaasi ku noolyahay waxyaaba sonkorta leh ambase macaan. Musqusha oo kale wax la cuno sida uu uga helo wey adagtahay. Musqusha waxuu ka cunaa waxa saabuunta ka hadha iyo dufanka anba dhagdhaga dhulka uu ka helo. Marka uu cayayaankaasi jikada joogo waxa uu heli karaa raashin uu ku noolaado isaga oo ku tarmaya bey’adda uu quud ka helayo. Waxaa muhiim ah inaad mar walba guriga iska nadiifiso si aad uga hor tagto tarankiisa. Si kastaba ha ahaato kalluunkaasi ma aha mid tarankiisu badanyahay.

Talooyin kahortag ah

Habka looga hor tagayo waxaa ka mid ina loo dhigo dabin, iyo inaad guriga ka ilaaliso qoyaanka. Dabcan waxa qoyaanku aad ugu badanyahay meelaha kaarbetka anba roogga hoostiisa. Guryaha qaarkood waxaa qoyaana yeesha shamaca dhulka hoostiisa halkaas oo uu ku dhalan karo cayayaankani. Habka guryaha ku dhisan sabbadda ay udhisanyihiin waxay keeni kartaa qoyaana . Hab kale oo looga hortagi karo kalluunkaasi waxa weeyi haddii aad haysato qalabka hawadu kasoo baxdo ina aad naaqus ka dhigto waayo qoyaana aya ka yimaadda.

Talooyin ku sahabsan habka aad u dhigeysa dabinka

Fur baakidka oo soo saar waxa ku jira.

Sida sawirka kaaga muuqda waxaad isku laabeysaa waraaqda si ay uyeelato hadh maadaama uu kallunkaasi mugdiga jecelyahay. Marka aad isku laabto waxa uu eekanayaa guri saqafkiisa oo kale. Waraaqda inta hoos taala ee u ah "guriga" salka waxaad ka jareysaa Xaashida sare waxaa kuusoo hadheysa xaashi hoose oo xabag leh taasi oo loogu talo galay ina xansharaadku marka uusoo galo iney ku dhagto. "guriga" dabinka kuu ah waxaad badhtamaha isa dhigeysa daawada la socota dabinka ee soo jiidaneysa cayayaanka. Dabinka waxaad dhigeysaa khaanadaha jikada iyo armaajooyinka iyo meelaha aad uga shaki qabto in cayayaankaasi ku jiro.

Kundtjänst tel:08-6268350 anba 020-474500

Waa telefanka adeegga bulshada ee lagaa caawin karo

kundtjanst@sveamiljo.se

waa cinwaanka shabakada internetka.